



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA DISEEMBER 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Diseembar 2023 ayaa gaaray 143.57, marka la barbardhigo 144.92 bishii Nofeembar 2023.

Isbedel bileedka, Diseembar 2023, marka la barbar dhigo Nofeembar 2023, ayaa hoos u dhacay -0.93 boqolkiiba.

Majirin isbedel la taaban karo bishii Diseembar.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Diseembar 2022 iyo Diseembar 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 6.60 boqolkiiba, marka la barbardhigo 7.06 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Nofeembar 2022 iyo Nofeembar 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Diseembar 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Nofeembar 2023	
Tusaha bishan (Diseembar 2023)	143.57
Tusaha bishii hore (Nofeembar 2023)	144.92
Tusaha sanadkii hore (Diseembar 2022)	134.68
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.93%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	6.60%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha Diseembar 2023 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Diseembar 2023

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Diseembar 2023

Heerka sicir-bararka bisha Diseembar 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2022 iyo Diseembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 6.60 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Diseembar 2022 iyo Diseembar 2023, marka labar bardhigo 7.06 boqolkiiba 12kii bilood, Nofeembar 2022 iyo Nofeembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Diseembar 2023 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan -0.93 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Diseembar 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -2.24 boqolkiiba, bishii Diseembar 2023 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 2.94 boqolkiiba bishii Nofeembar 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -2.11 boqolkiiba bishii Diseembar 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray --1.76 boqolkiiba Nofeembar 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaan isbedel bille ah jirin oo ahaa 0.00 boqolkiiba Diseembar 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 15.98 boqolkiiba Diseembar 2023. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo ahaa 18.05 boqolkiiba ee Nofeembar 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha Diseembar 2023 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Diseembar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkolkiiba bishii Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 51.84 boqolkiib bishii Diseembar 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+85.71 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 15.98 boqolkolkiiba bishii Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada & Gaaska (+12.37 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 13.96 boqolkiiba Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.10 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+34.55 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 12.72 boqolkolkiiba bishii Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+33.17 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 12.09 boqolkiiba Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+14.65 boqolkiiba).


War bixin bileedka bisha Diseembar 2023 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 8.89 boqolkiiba Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+18.82 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba, bishii Diseembar 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+18.52 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.20 boqolkiiba bishii Diseembar 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+4.97 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Diseembar 2023 (-)

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda sannadlaha ahi hoos u dhacay -2.11 boqolkiiba, bishii Diseembar 2023. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha cuntada (-2.09%)

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Diseembar 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Diseembar 2023 (+)

Tubaakada ayaa la diwaangaliyey sare u kac bilaha ah oo gaaraya 3.04 boqolkiib bishii Diseembar 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka Miiraha ah (+9.70 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sannadlaha ahi hoos u dhacay -2.24 boqolkiiba, bishii Diseembar 2023. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha cuntada (-2.36%)

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Diseembar 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Diseembar 2022 TSB	Nofeembar 2023 TSB	Diseembar 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	134.68	144.92	143.57	-0.93	6.60
Cuntada & Cabitaanada	46.04	144.36	144.56	141.32	-2.24	-2.11
Tubaakadda	1.25	115.22	168.67	173.80	3.04	50.84
Dharka & Kabaha	5.03	148.98	169.52	169.78	0.15	13.96
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	124.46	144.35	144.35	0.00	15.98
Agabka Guryaha	2.93	109.53	118.10	119.27	0.99	8.89
Caafimaadka	5.00	172.91	182.78	182.78	0.00	5.71
Gaadiidka	3.77	108.42	122.04	122.21	0.14	12.72
Isgaarsiinta	2.80	103.03	166.78	166.78	0.00	61.87
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	150.45	150.45	0.00	3.20
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	108.31	120.63	121.41	0.64	12.09

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Janaayo, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Febraayo, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Nofeembar 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia